

OGEYSIISKA FURSADA KA QAYBQAADASHADA SAHANKA

Badbaadada & Qiimaynta Caafimaadka & Daraasaadka Ka Hortaga (SHARP)

PO Box 44330, Olympia, WA 98504-4330, 1-888-667-4277

*Caroline K. Smith, PhD, Baaraha Madaxa
(360) 902-4528, Caroline.Smith@Lni.wa.gov*

Waardiyeeyasha iyo ilaaliyaashu waxay halis ugu jiraan dhaawac culus oo shaqada kasoo gaara. Kooxda daraasaadka SHARP ee Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ayaa ay sharci-dajiyayaasha Gobolka Washington ka codsadeen inay daraasadeeyaan:

- shaqadaada,
- goobtaada shaqada, iyo
- kaala hadlaan khataraha aad kala kulanto shaqada.

[Maxaa sahankan loo sameynayaa?](#)

Hadafkeenu waa in la aqoonsado qaabab lagu yareeyo dhaawacyada iyo jiroyoonka la xiriira shaqada ee ku yimaada waardiyeeyasha iyo ilaaliyaasha, dedaal lagu abuurayo xaalado shaqo oo badbaado iyo cafimaad badan. Wuxaan jeclaan lahayn inaan la hadalno ugu yaraan 1,000 waardiyeeyaal iyo ilaaliyeeyaal ah si aan wax uga oggaano waxyaabaha ay la kulmaan.

Wuxaan shaqaaleysiinay Pacific Market Research si aan sahan ugu sameyno waardiyeeyasha iyo ilaaliyaasha guud ahaan gobolka, si aan wax uga oggaano shaqadaada. Wuxaan rabnaa inaan wax ka oggaano dhamaan khataraha aad kula kulanto shaqada, oo ay ku jiraan cagajuglaynta, kadeedista iyo rabshadeeynta. Wuxa laguu doortay sababtoo ah wuxaan kuu aqoonsanay inaad tahay qof loo shaqaalaysiyyay waardiye ama ilaaliye ahaan 12-kii bilood ee la soo dhaafay.

[Maxaa la i weydiin doonaa inaan sameeyo?](#)

Lifaaqu waa sahan ka socda cilmibaarayaasha aan iskaashiga la leenahay ee Pacific Market Research. Haddii aad hadda u shaqeysyo, ama 12-kii bilood ee la soo dhaafay aad ahayd waardiye ama ilaaliye, wuxaan kaa codsanaynaa inaad fadlan buuxiso sahanka, wuxa muhiim ah inaan jawaabtaada helno. **Sahanku waa mid ikhtiyaari ah oo qarsoodi ah.** Pacific Market Research iyo SHARP midkoodna cidna uma sheegi doono jawaabaha sahankaaga.

Go'aankaaga ka qaybqaadashada daraasadu ma saameyn doono wax kiis sharci ah ama sheegasho magdhow shaqaale oo aad leeday. Khasab kuguma aha inaad ka qeybqaadato. Haddii aad doorato inaad ka qeybqaadato, waad ka boodi kartaa su'aalaha aadan dooneynin inaad ka jawaabto ama aad waad joojin kartaa sahanka waqtigaad doonto.

Waxay qaadataa 40 daqiqi in la buuxiyo foomka su'aalaha, iyo haddii aad buuxiso sahanka, wuxaad heli doontaa **\$15 kaarka abaalmarinta Visa ee hore lacagta loogu shubay** (oo boostada laguugo soo diri doono, kadib markaad ka qeybqaadato). Waan ognahay inay tani dheer tahay, laakiin wuxaan qabnaa su'aalo ku saabsan qaybo badan oo shaqadaada kamid ah. Shaqaalaha qaar ayaa laga yaabaa inay hayaan wax badan ama wax yar oo ay nala wadaagaan, laakiin 40 daqiqi waa waqtiga ay celcelis ahaan qaadan doonto in la buuxiyo sahanka. Ma jiri doonaan ganaaxyo ka dhalanaya diidmada ka qeybqaadashada, ama haddii aad jeceshahay inaad ka boodo su'aalaha ama aad joojiso wareysiga waqtigaad doonto.

Lagaagama baahna inaad ka jawaabto dhamaan su'aalaha si aad ugu qalanto kaarka abaalmarinta hore lacagta loogu shubay. Dhamaan macluumaadka aad wadaagi doonto waxay noqon doonaan qarsoodi. Lama wadaagi doono magacaaga ama macluumaadkaaga shakhsiga ah qof ka baxsan kooxda cilmi-baarista, macluumaadka kasta oo aad bixisidna lalama wadaagi doono cida aad u shaqeysid. Magacaaga kuma dari doono wixii warbixin ah ee aan qorno. Ka reebista kaliya ayaa ah in Siyaasada Hay'ada Gobolka Washington ay u baahan tahay soo sheegista hanjabaadaha waxyeelida nafta ama dadka kale. Haddii aan xogta sahankan mar labaad mustaqbalka u isticmaalno mashruucyada kale ee caafimaadka iyo badbaadada, magacaaga iyo macluumaad kasta oo lagugu aqoonsanayo waa laga saari doonaa. Macluumaadkaaga xiriirka ee shakhsiga ah ayaa gaar looga sooci doonaa jawaabaha sahankaaga waana la tirtiri doonaa kadib marka aan kuusoo dirno kaarkaaga abaalmarinta ee hore lacagta loogu shubay, ama 1 sanno gudaheed ka qaybqaadashada daraasada, haddii aad si gaar ah u oggolaato in mar kale lagula soo xiriiro mustaqbalka mooyee.

[Waa maxay khataraha ama waxyeellooyinka suurtagalca ah haddii aan ka qeybqaato?](#)

Marka lagu daro wadahadalka ku saabsan howlahaaga shaqada, waxaan ku weydiin doonaa caafimaadkaaga jirka iyo maskaxda, iyo haddii aad la kulantay takoorid, u xoog sheegasho, iyo galmaada iyo noocyada kale ee kadeedka. Tusaale ahaan, "Ma waxaad dareentaa in si uun laguugu takooray shaqadaada sababtuna tahay isirkaaga ama asalkaaga?" Iyo, "Sannadkii la soo dhaafay, dhowr jeer ma laguu sheegay sheekoooyinka galmaada ama kaftan cay kuu ahaa?" Sahankeena ayaa laga yaabaa inuu kaa dhigo mid aan xasiloonayn ama dareemaya diiqad marka aad ka hadlayso shaqadaada, si kastaba ha noqotee, shaqaale badan ayaan la kulmaynin tan oo waxay ku raaxeystaan inay nagala hadlaan waxyaabaha ay la kulmeen waxaanay ku faraxsan yihiin inay gacan ka geystaan dedaalada lagu horumarinayo xaaladaha caafimaad iyo badbaadada ee shaqaalaha kale ee la shaqeeya. Haddii aad dhib dareento, waad ka boodi kartaa su'aasha, waad joojin kartaa wareysiga, ama ka bixi kartaa waqtigaad doonto. Mar labaad, macluumaadkaagu wuxuu ahaan doonaa qarsoodi oo taxaddarrada amniga xogta (tusaale ahaan, kumbuyuutar laga dhigay qarsoodi, ilaalinta lambarka sirta ah, helitaan xaddidan) ayaa la sameyn doonaa si loo hubiyo inay qarsoodi tahay lalamana wadaagi doono cid ka baxsan kooxda sahanka.

[Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan oggaado?](#)

Waxaad wici kartaa Golaha Dib-u-eegida Hay'ada Gobolka Washington haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada ama walaacyada/cabashoooyinka ku saabsan sahanka. Guddiga Dib-u-eegida Hay'ada Gobolka Washington ayaa kormeera daraasadan si loo hubiyo in xuquuqda dadka ka qeybqaadanaya la ilaaliyo. Waxaad ka wici kartaa 1-800-583-8488. Khasab kuguma aha inaad sheegtid magacaaga haddii aad wacdid.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan sahankan, aad rabto inaad wax badan ka barato mashruuca, aad u hesho liistada ilaha suurtagalca ah, ama aad toos ula xiriirto shaqaalaha cilmibaarista, waxaad sidoo kale booqan kartaa bogga Janitorial Workload Study: <https://www.lni.wa.gov/Safety/Research/Projects/Janitorial/> ama, wac Caroline Smith oo ka shaqaysa barnaamijka SHARP 1-888-667-4277.

Cilmibaarayaasha aan iskaashiga la leenahay ee Pacific Market Research ayaa sidoo kale sahankan ka dhigay mid laga heli karo khadka internetka, waxaadna uga jawaabi kartaa foomkan

su'aalaha elektaroonig ahaan adoo booqanaya bogga www.JanitorStudy.com isla markaana galinaya PIN-ka laga heli karo bogga koowaad ee warqadan si aad u buuxiso sahanka. Pacific Market Research ayaa sidoo kale kaala soo xiriiri kara taleefanka si loo buuxiyo foomka su'aalaha. Haddii aad ogtahay inaadan rabin in lagusoo waco, fadlan immika wac Pacific Market Research 1-877-321-5874 oo u dhaaf farriin wadata lambarka pin-ka ee laga heli karo bogga kowaad ee warqadan isla markaana codsanaya inay kaa saaraan liiska Janitorial Workload Study ee Gobolka Washington, kulamana soo xiriiri doonaan. Wuxaad sidoo kale iimayl noogusoo diri kartaa JanitorStudy@LNI.wa.gov adigoo noo sheegaya magacaaga iyo lambarka taleefankaaga, waxaan oo geysiin doonaa Pacific Market Research inaysan kula soo xiriirin.

SI daacadnimo leh,



Caroline Smith
SHARP Program
Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha Gobolka Washington